

Wadada ay u mareen salafka masaaisha ay ka furan tayah ijtihaadka

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

إِنَّ الْحَمْدَ لِلَّهِ، نَحْمَدُهُ وَنَسْتَعِينُهُ، وَنَسْتَغْفِرُهُ، وَنَعُوذُ بِاللَّهِ مِنْ شَرِّ أَنفُسِنَا، وَسَيِّئَاتِ أَعْمَالِنَا، مِنْ يَهْدِهِ اللَّهُ فَلَا
مُضْلَلٌ لَهُ، وَمَنْ يَضْلُلُ فَلَا هَادِيٌ لَهُ، وَأَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَحْدَهُ لَا شَرِيكَ لَهُ وَأَشْهَدُ أَنَّ مُحَمَّداً عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ.
(يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ حُقُّ تَقَاتِهِ وَلَا تَمُوتُنَّ إِلَّا وَأَنْتُمْ مُسْلِمُونَ) ، (يَا أَيُّهَا النَّاسُ اتَّقُوا رَبَّكُمُ الَّذِي خَلَقَكُمْ
مِنْ نَفْسٍ وَاحِدَةٍ وَخَلَقَ مِنْهَا زَوْجَهَا وَبَثَ مِنْهُمَا رِجَالًا كَثِيرًا وَنِسَاءً وَاتَّقُوا اللَّهَ الَّذِي تَسَاءَلُ بِهِ وَالْأَرْحَامَ
إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلَيْكُمْ رَقِيبًا) ، (يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَقُولُوا قَوْلًا سَدِيدًا يَصْلُحُ لَكُمْ أَعْمَالُكُمْ وَيَغْفِرُ لَكُمْ
ذُنُوبَكُمْ وَمَنْ يَطْعُ اللَّهَ وَرَسُولَهُ فَقَدْ فَازَ فَوْزًا عَظِيمًا) .

أَمَّا بَعْدُ، فَإِنَّ أَصْدِقَ الْحَدِيثِ كِتَابُ اللَّهِ، وَأَحْسَنُ الْهَدِيَّ هَدِيُّ مُحَمَّدٍ، وَشَرُّ الْأُمُورِ مَحْدُثَاتُهَا، وَكُلُّ مَحْدُثَةٍ بَدْعَةٌ
وَكُلُّ بَدْعَةٍ ضَلَالَةٌ، وَكُلُّ ضَلَالٍ فِي الدُّرُجَاتِ

Baraarugan barakaysan hadhkiisa oo ay ku nooshahay umadan muslimka ah ayaa waxaa dib
uga dhex bilowdey waxa loo yaqaano (الحركة العلمية) dhaqdhaqaaq cilmiyeed,in badan oo
kamid ah da,yartuna waxay dib u bilaabeen barashada culuumta sharciga kala duwan,waa
arin khayr badan oo wanaagsan ,hase yeeshee waxaa lagu mashaqeeyey da,yarta qaarkood
ee cilmiga baranaya labo arimood oo aad u khatar badan:-

1-in ay ku degdeegaan (الفتوى) Fatwada iyaga oo aan wax badan ka garanayn (أدوات الفتوى)
tiirarka fatwada.

رحمه الله وليد بن عبد الله بن قاسم

وَلَا يَتَمَكَّنُ الْمُفْتَى وَلَا الْحَاكِمُ مِنَ الْفَتْوَى وَالْحُكْمِ بِالْحَقِّ إِلَّا بِنَوْعَيْنِ مِنَ الْفَهْمِ : أَحَدُهُمَا: فَهْمُ الْوَاقِعِ
وَالْفَقْهُ فِيهِ وَاسْتِبْطَاطُ عِلْمِ حَقِيقَةِ مَا وَقَعَ بِالْقُرْآنِ وَالْأُمَارَاتِ وَالْعَلَمَاتِ، حَتَّى يَحْيِطَ بِهِ عِلْمًا.

وَالثَّانِي: فَهْمُ الْوَاجِبِ فِي الْوَاقِعِ ، وَهُوَ فَهْمُ حُكْمِ اللَّهِ الَّذِي حَكَمَ بِهِ فِي كِتَابِهِ أَوْ عَلَى لِسَانِ رَسُولِهِ
فِي هَذَا الْوَاقِعِ.

ثُمَّ يَطْبَقُ أَحَدُهُمَا عَلَى الْآخَرِ فَمَنْ بَذَلَ جَهْدَهُ وَاسْتَفْرَغَ وَسْعَهُ فِي ذَلِكَ لَمْ يَعْدُ أَجْرَيْنِ أَوْ أَجْرًا،
فَالْعَالَمُ مِنْ يَتَوَصِّلُ بِعِرْفَةِ الْوَاقِعِ وَالتَّفَقَهُ فِيهِ إِلَى مَعْرِفَةِ حُكْمِ اللَّهِ وَرَسُولِهِ (إِعْلَامُ الْمُوقِعِينَ)
(69\1)

(uma suurto geli kartu Muftiga ama Caalimka inuu xaq wax ku xukmiyo inuu haysto uun
mooyee labo nooc oo faham ah: midkood waa inuu fahamsan yahay waqqaca waxa
dhacayna xaqiiodooda uu lasoo bixi karo isaga oo adeegsanaya calaamado si uu waxaas u
ogaado.

Mida labaad waa : inuu fahamsan yahay waxa ka waajibaya waqqacaas, oo ah inuu garanayo
ama yaqaana waxa ay ku xukmiyeen Allaah iyo Rasuulkiisa صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ waxa dhacay.

Kadibna uu isku dhabaqa labada faham, qofkii dadaalkisa ku bixiya arinkaas mawynaayo labo ajar ama hal ajar, Caalimkuna waa qofka ku gaara garashada waaqaca inuu garto xukumka Alle iyo Rasuulkisa (صلى الله عليه وسلم)

2-Khatarta labaad waxay tahay da,yarta cilmiga dalbaysa qaarkood markii ay dadaal ku bixiyaan mas,alo kamid ah masaaisha ijtihaadku ka furan yahay,kadibna dadaalkiisa uu lagaaro inuu qaato ra,yi, waxa uu aaminayaawaxa uu gaaray inuu yahay xaqii saxda ahaa oo aan lakhilaafi karin, wixii khilaafana uusan ahayn waxa loo yaqaano (مرجوح) ee uu yahay (باطل),waxaa intaa sii dheer inuu dadka ku qasbayo inay qaataan ra,yigiisa, mas,aladaas darted ayuu dadku kusoo dhoweysanayaa ama ku fogeynayaa, qofkii isaga ku raaca ra,yigiisa waa nin xaqa raacay lajecelyahay qofkii ku khilaafana waa jaahil tareenka ka dhacay ama waa jaajuuus gaalo u shaqeeya ama waa murtad xerada islaamka kabaxay ay banaan tahay in lagu dilo xilli iyo xaram.

Sidaa daraadeed waxaan jecleystay inaan qoro maqaalkan oo aan ku cadeeyo jidka ay salafka umari jireen masaaisha ijtihaadku ka furan yahay waxaan Allaah karajeynayaa inuu nagu anfaco da,yartana uu ku anfaco, intaanan mowduuca guda gelin waxaan jeclahay inaan baraarujiyo laba arimood oo Kala ah:

a)Culimada musliminta iskuma ayan khilaafi jirin nafjecleysi hase yeeshay khilaafkoodu waxaa uu ku dhisnaa ijtihaad iyo xaq raadin.

b)Culimada waa dadka ugu dhow Allaah uguna cabsida badan (إنما يخشى الله من عباده العلماء)
فاطر

raadadka ay cabsidoodu ka tagtay waxay ka dhex muuqanaysaa fataawoo yinkooda iyo sida ay uga xalaal miiran jireen fatwada, bal ila eega qaybo kamid ah hadaladooda.

قال سُفِّيَانَ أَدْرَكْتُ الْمُقَهَّاءِ وَهُمْ يَكْرُهُونَ أَنْ يَجِيئُوا فِي الْمُسَائِلِ وَالْفَتْيَا حَتَّىٰ لَا يَجِدُوا بَدًا مِنْ أَنْ يَفْتَوَ (صفة الفتوى) 12

(Waxaan soo gaaray fuqahada iyagoo nacaya inay kajawaabaan su,aalaha iyo fatwooyinka in looga maarmi waayo mooyee).

وَقَالَ عَطَاءً أَدْرَكْتُ أَقْوَامًا إِنْ كَانَ أَحَدُهُمْ لِيَسْأَلُ عَنِ السَّيِّءِ فَيَتَكَلَّمُ وَإِنَّهُ لِيَرْعَدُ (صفة الفتوى) 9

(waxaan soo gaaray dad midkood markii lawaydiyo su,aal waxaa uu kajawaabaya iyadoo ay laabtiisu gargariireyso)

وَقَالَ ابْنَ مَسْعُودٍ مِنْ أَفْتَى النَّاسُ فِي كُلِّ مَا يَسْأَلُونَهُ عَنْهُ فَهُوَ مَجْنُونٌ (صفة الفتوى) 7

(Qofkii dadka uga jawaaba wax kasta oo ay waydiyaan waa mid waalan)

وَقَالَ أَبُو حُصَيْنِ الْأَسْدِيِّ إِنْ أَحَدُكُمْ لِيَفْتَيِ فِي الْمَسْأَلَةِ لَوْ رَدَتْ عَلَىٰ عُمَرَ بْنِ الْخَطَّابِ لِجَمْعِ لَهَا أَهْلَ بَدْرٍ (صفة الفتوى) 7

(Qofkiina waxaa uu kajawaabaya su,aal hadii cumar binu khadhaab korkiisa kusoo aroori lahayd (loo keeni lahaa) waxa uu ukulmin lahaa reer beder).

Tusaalooyinkaas waxaan meesha u keeney inaan ku garano sida ay dadkii khayrka badnaa isaga ilaalil jireen inay ku degdegaan fatwada ama kajawaabaan waxkasta oo loo keeno, maantana waxaad arkaysaa dadka qaarkii laga yaabaa inuu ku cusub yahay baraarugan islaamiga ah, inay u sahlan tahay inay kajawaabaan wax kasta oo loo keeno amaba isaga ayaaba jecel inuu wax kasta kajawaabo, markaas buu baneynayaad dad dhiigooda xoolahooda iyo cirdigoodaba سیحان الله و تعالیٰ عما يقولون علوا کییرا

1-Foolxumada kalategida iyo is khilaafka

Alle iyo Rasuulkisa waxa ay inagu booriyeen inaan midowno oo aynaan kala tagin, dhanka kalana waxay aad u caayeen una fogeeyeen in lagu kala tago diinta ama la isku khilaaf.

واعتصموا بحبل الله جمِعاً ولا تفرقوا (آل عمران \ 103)

إِنَّ الَّذِينَ عَنْ دِينِهِمْ يُجْنَبُونَ إِنَّمَا يُنْهَا النُّفُوسُ عَنِ الْحَقِيقَةِ إِذَا هُنَّ مُبَشِّرَاتٍ (آل عمران \ 19)

Nabigeena Muxamad صلی الله علیہ وسلم waxa uu yiri :-

وعن جابر بن عبد الله رضي الله عنهما قال: قال رسول الله صلی الله علیہ وسلم:- إن الشيطان قد أليس أن يعبده المصلون في جزيرة العرب ، ولكن في التحرير بينهم) اخرجه أحمد ومسلم والترمذى .

(shaydaanka waxa uu ka quustay in jaziiratul carab ay ku caabudaan ahlul iimaanka isaga, laakin wuxuu u ordayaa inuu kala geeyo).

Xadiiska waxaa kaloo lafu fasiraa macaani kale.

وقال صلی الله علیہ وسلم : تفتح أبواب الجنة يوم الإثنين ويوم الخميس ، فيغفر لكل عبد لا يشرك بالله شيئاً ، إلا رجال كانت بينه وبين أخيه شحناه، فيقال : أنظروا هذين حتى يصلحا ، أنظروا هذين حتى يصلحا، أنظروا هذين حتى يصلحا) أخرجه أحمد ومسلم.

(Maalin kasta oo isniin iyo khamiis ah waxaa lafuraa albaabada janada , waxaa loo dembi dhaafaa qof kasta cibaadada ilaahay aan lawaadaajinin cid kale, laakin qofka isaga iyo walaalkii dhextaala xumaan waxaa laleeyahay ukaadiya ilaa ay ka heshiiyaan, ukaadiya ilaa ay ka heshiiyaan, ukaadiya ilaa ay ka heshiiyaan).

2-Wadada ay saxaabodu umari jireen masaaiha ijtihaadku ka furan yahay:-

Saxaabada رضي الله عنهم waxay isku khilaafeen masaail fara badan iyagoo ah dadka kuwa ugu qalbi baarisan,saafisan, caqli badan iyo weliba ugu faham badan, waxay goob joog ka ahaayeen soo degista quraanka waxay garanayeen tafsiirkiisa waxay fahmayeen ujeedka uu Nabi Muxamad lahaa , hadana kuma ayan kala tegi jirin diinta,walaalnimada bal waa ay isu cudur daari jireen, waakan wax kamin ah tusaalooyiin kooda :-

عن عبد الرحمن بن يزيد، يقول: صلی بنا عثمان بن عفان رضي الله عنه بمنى أربع ركعات، فقيل: ذلك لعبد الله بن مسعود رضي الله عنه، فاسترجع، ثم قال: «صليت مع رسول الله صلی الله علیہ وسلم بمنى ركعتين، وصليت مع أبي بكر الصديق رضي الله عنه بمنى ركعتين، وصليت مع عمر بن الخطاب رضي الله عنه بمنى ركعتين» ، فليت حظي من أربع ركعات ركتان متقبلتان) أخرجه البخاري

Waxaa uu yiri c/raxmaan binu yaziid : waxaa mina inagu tukiyay Cuthman binu cafaan Alle raali haka noqdee afar rakcadood, markaasaa loo sheegey ibnu mascuud R C kadibna waa uu istirjaacsadey (إِنَّا لِلَّهِ عَلَيْهِ وَسُلْطَانُهُ) wuxuuna yiri Nabi Muxamad (صلى الله عليه وسلم) baan mina kula tukaday labo rakcadood , abu bakarna waxaan mina kula tukaday labo rakcadood, cumarna waxaan mina kula tukaday labo rakcadood nasiibkayga aan ka helayo afar rakcadood muu noqdo labo rakcadood oo layga aqbalo .

Waxa uu abu daawuud kordhiay inuu c/Ilaahi ibnu mascuud tukaday afar rakcadood kadibna yiri khilaafku waa shar , ama khilaafka ayaan nacayaan.

قال بن تيمية رحمه الله:- وقد اتفق الصحابة في مسائل تنازعوا فيها ، على أن الإقرار كل فريق للفريق الآخر باجتهادهم ، كمسائل في العبادات والمناكح والمواريث ، والعطاء، والسياسة، وغير ذلك.

و حكم عمر أول عام في الفريضة الحمارية بعدم التشريك ، وفي العام الثاني التشريك في واقعة مثل الأولى، ولما سئل عن ذلك قال: تلك ما قضينا وهذه ما نقضي .

و هم الأئمة الذين ثبت بالصوص أنهم لا يجتمعون على باطل ولا ضلال ، و دل الكتاب والسنة على وجوب متابعتهم.

و تنازعوا في مسائل عملية إعتقادية، كسماع الميت صوت الحي ، و تعذيب الميت بكاء أهله، و رؤية محمد صلى الله عليه وسلم ربه قبل الموت ، مع بقاء الألفة والجماعة). قاعدة في توحد الملة وتعدد الشرائع لابن تيمية، ضمن مجموعة الرسائل المنيرية 3\136

(Waxay saxaabada رضي الله عنهم isla ogolaadeen kadib markii ay ku doodeen masaail in qolo kasta loo ogolaado inay ku dhaqanto dadaalkeeda,sida masaail ku saabsan cibaadaadka ,guurka,dhaxlka, mushaharaadka,siyaasada iyo waxyaabo kale.

Cumar binu khadhaab –Alle haka raali noqdee wixa uu ku xukmiyay mas,aladii ximaariyada ahayd (الحمارية) sanadkii koowaad in walaalaha Ashiqada ah dhaxalka waxba ku lahayn, halka sanadkii labaad xukmiyay inay dhaxalka ka qaybqaataan, markii cumar lawaydiyyay howshaas wixa uu kujawaabay:- taas anagaa xukminay tanna anagaa xukminayna.

Waana aimada ay nusuusta kusugnaatay in aanay ku kulmaynin baadhil, kitaabka iyo sunaduna ay tilmaameen inay waajib tahay in iyaga lagu daydo.

Waxay kaloo ku doodeen masaail camali ictiqaadi ah sida maydka mamaqlayaa codka qofka nool,maydka malagu cadaabayaa oohinta ahalkiisa,Nabi muxamad (صلى الله عليه وسلم) ma arkay Rabigiisa inta uusan dhiman ka hor , iyada oo ay baaqi tahay midnimadooda).

3-Wadada ay salafka umari jireen masaaisha ay ka furan tahay in lagu ijtihaado

Salafku waxay isku khilaafeen masaail fara badan, iskumana inkiri jirin masaaisha lagu ijtihaadi karo, waxay ahaayeen kuwa qalbigooda isu furan, waxa uu yiri Yaxya ibnu saciid al-ansaari oo kamid ahaa ragii taabiciinta ugu qiimaha badnaa:-

ما برح أولو الفتوى يفتون فيحل هذا ويحرم هذا فلا يرى المحرم أن المحل هلك لتحليله ولا يرى المحل أن المحرم هلك لحريمه) جامع بيان العلم وفضله \ 2\161

(Kama suulin dadka fatwada ahalka u ah inay fatwoonayaan mid baa wax xalilaya mid kalaa xarimaya, kan wax xalilay uma arkayo kan wax xarimay inuu halaagsamay , kan wax xarimayna uma arkayo xan wax xalilay inuu halaagsamay).

Waxa uu yiri yuunus al-sadafiyi:-

ما رأيت أعقل من الشافعي، ناظرته يوماً في مسألة، ثم افترقا، ولقيني، فأخذ بيدي، ثم قال: يا أبا موسى، لا يستقيم أن تكون إخوانا وإن لم تتفق في مسألة سير أعلام البلاء \ 10\16

(Ma arag qof ka caqli badan imaamu shaafici, maalin baan wada doodney kadib waan kala tagnay ,hadana wuu ila kulmay inta gacanta i qabtay buu igu yiri : muusa aabihiisiyow mawaanay fiicnayn inaan ahaano walaalo yanyaamba isku waafaqin mas,alo).

Al-imaamu dahabi oo tacliqinaya hadalka imaamu shaafici waxa uu yiri:-

هذا يدل على كمال عقل هذا الإمام، وفقه نفسه، فما زال النظارء يختلفون سير أعلام البلاء \ 10\17

(Tani waxay tusinaysaa in uu dhamaystiran yahay caqliga imaamu shaafici, iyo aqoontiisa, dadka isku ayniga ah marwalba waa kuwa is khilaafa).

Wuxu kaloo yiri:-

ثم إن الكبير من أئمة العلم إذا كثُر صوابه، وعلم تحريره للحق، واتسع علمه، وظهر ذكاؤه، وعرف صلاحه وورعه واتباعه، يغفر له زلة، ولا نصلله ونطرحه ونسبي محاسنه.
نعم، ولا نقتدي به في بدعته وخطئه، ونرجو له التوبة من ذلك) سير أعلام البلاء \ 5\271

(Hadii caalim kamid ah Culimada waawayn ay badan tahay inuu waafaqo xaqa , lana ogyahay inuu ku dadaalayo xaqqa ,cilmigiisana uu balaaran yahay ,caqligiisana uu muuqdo,la ogaado wanaagiisa ,xalaalmiirashadiisa,iyo inuu sunada raacayo,waa loo dhaafaa simbiriraxashadiisa mana ku xukminayno inuu lumay wanaagiisana ma ilaawayno.

Kumana dayanayno bidcadiisa iyo khaladkiisa, waxaan u rajaynaynaa inuu kaao laabto khaladkaa ka dhacay).

Waxa uu yiri imaamu axmed:-

من أفتقى الناس ليس ينبغي أن يحمل الناس على مذهبه ويشدد عليهم) الآداب الشرعية والمنج المرعية \ 2\59

(Uma haboona qofka dadka u fatwoonaya inuu dadka ku qasbo madhabkiisa)

Waxa uu yiri al-imaam ibnul qayim:-

ومن له علم بالشرع والواقع يعلم قطعاً أن الرجل الجليل الذي له في الإسلام قدم صالح وآثار حسنة وهو من الإسلام وأهله بمكان قد تكون منه الهمزة والزلة هو فيها معذور بل ومحجور لاجتهاده، فلا يجوز أن يتبع فيها، ولا يجوز أن تهدر مكانته وإمامته ومنزلته من قلوب المسلمين \ إعلام الموقعين \ 3\220

(Qofkii aqoon u leh sharciga iyo waaqaca waxa uu garanaya si aan shaki kujirin qofka wayn islaaminadana ku dhex leh camal wanaagsan iyo raad fiican ,islaamka iyo ahalkiisana meel fiican kajooga inay ka dhici karto gef iyo simbiriraxasho looguna cudurdaarayoo bal laga ajarsiinayo dadaalkiisa,mabanaana in lagu raaco qaladkaas , mana banana in meel looga dhaco sharafkiisa,imaamnimadiisa,iyo booska uu kajoogo muslimiinta qalbigooda.)

4-Inkirid la,aantu makeeneysa xaqqa inaan lacadeynin ama xujada lamuujiinin

Waxaan uga jeedaa cinwaankan hadii dadku isku khilaafaan mas,alo ma,ahan in la isku inkiro aragtiyada kala duwan ee ay Culimadu ka qaateen mas,aladaas, hase yeeshii waxaa banaan is marwalba in la isu cadeeyo halka uu sawaabku kujiro xujadana lamuujiyo, waxa uu yiri Ibnu Taymiyah:-

إن مثل هذه المسائل الاجتهادية لا تذكر باليد وليس لأحد أن يلزم الناس باتباعه فيها؛ ولكن يتكلّم فيها بالحجج العلمية فمن تبيّن له صحة أحد القولين تبعه ومن قلد أهل القول الآخر فلا إنكار عليه) مجموع الفتاوى \ 30 \ 80

Masaashan oo kale ijtihaadku ka furan yahay laguma inkiray, qofna xaq uma lahan inuu dadka ku qasbo inay isaga kusoo raacaan ,laakin si cilmiyaysan oo xujo leh buu uga hadli karaa , qof kay u cadaato labada qowl ee mas,alada kusoo aroorey midka saxda ah wuu raacayaa, qofkii kaga dayda mas,alada qof kale hade laguma inkiray.

5-Ijtihaadka banaan makeenayo kala tegid iyo xadgudub.

Waxa uu yiri sheykhul islam ibnu Taymiyah:-

ولكن الاجتهد السائع لا يبلغ مبلغ الفتنة والفرقـة إلا مع البغـى لا لمجرد الاجتـهـاد
كما قال تعالى وما اختلف الذين أتوا الكتاب إلا من بعد ما جاءهم العلم بغيـا بينـهم [سورة آل عمران 19] وقال إن الذين فرقـوا
ديـنـهـم وـكـانـوـ شـيـعـاـ لـسـتـ مـنـهـمـ فـيـ شـئـ [سورة الأنـعـامـ 159] وقال ولا تـكـونـواـ كـالـذـينـ تـفـرـقـواـ وـاـخـتـلـفـواـ مـنـ بـعـدـ ما جـاءـهـمـ الـبـيـنـاتـ
[سورة آل عمران 105]
فـلاـ يـكـونـ فـتـنـةـ وـفـرـقـةـ مـعـ وجـودـ الـاجـتـهـادـ السـائـعـ بـلـ مـعـ نوعـ بـغـىـ) الإـسـتـقـامـةـ \ 1 \ 31

(Ijtihaadka banaan magaarayo heer fitno iyo kalategid, in uu jiro xadgudub mooyee ,sida Allaah yiri (Isma ayan khilaafin kuwii kitaabka lasiiyay illaa waxay is khilaafeen markii cilmiga uyimid iyaga oo isku xadgudbay.

Alle waxuu kaloo yiri (Kuwii ku kala tagay diinkooda oo kooxa kooxa noqday adigu kamid ma tihid)

Alle waxuu kaloo yiri:(Hanoqonina sida kuwii kalatagay oo iskhilaafay markii uu xaqqa uyimid kadib)

Markaas uu yiri ibnu Taymiyah: Fitno iyo kalatagid majireyso hadii uu jiro ijtihaad banaan(السانخ) fitnada iyo kalategida waxay jiri kartaa markii uu jiro nooc xadgudub ah.

6-Masaisha ay banaantahay in la isku inkiryo kuwa aan banaanayn

Masaisha la isku khilafo waxay u qaybsantaa labo qaybood.

Qaybta koowaad waa qayb ay banaantahay in la isku inkiri karo bal ay waajib tahay in la isku inkiryo, hadii hadalka caalimku uu khilafo Nas cad oo kusugan Kitaabka Allaah ama Sunada Nabiga وسلام عليه الله صلى واسعها amma ijmaac saxiix ah, sida qof yiri Ribadu waa xalaal ama khamriga waa lacabi karaa, ama kaleexdey Manhajka ahlusunah waljamaacad baabka caqiidada la isla ogolyahay, markaas oo kale waa la isku inikiraya.

Qaybta labaad waa masaisha aan banaanayn in la isku inkiryo , sida masaisha ijtihaadka ee aan ku dhamaystirnayn Nusuusta cad cad ama aan laga dhexheleynin nusuus, Ijmaac saxiixna aan ku dhexjirin, Tusaale ahaan waxaa kamid ah : Dahabka ay dumarku xirtaan maka waajibaya Zako mise kama waajibayo, Salaada taraawiixda rakcaadkeedu waa meeqa, Marka uu ruuxu sujuudayo ma jilbaha ayuu hormarinayaa mise gacmaha iyo Tusaalooyin kaloo fara badan oo ay salafku isku khilaafeen.

Al-imam ibnu Taymiyah waxa uu yiri isaga oo arinkan ka hadlaya :-

وقولهم: " إن مسائل الخلاف لا إنكار فيها " ليس بصحيح؛ فإن الإنكار إما أن ينوجه إلى القول والفتوى أو العمل، أما الأول فإذا كان القول يخالف سنة أو إجماعا شائعاً وجب إنكاره اتفاقاً، وإن لم يكن كذلك فإن بيان ضعفه ومخالفته للدليل إنكار مثله، وأما العمل فإذا كان على خلاف سنة أو إجماع وجب إنكاره بحسب درجات الإنكار، وكيف يقول فقيه لا إنكار في المسائل المختلفة فيها والفقهاء من سائر الطوائف قد صرحو بنقض حكم الحاكم إذا خالف كتاباً أو سنة وإن كان قد وافق فيه بعض العلماء؟ وأما إذا لم يكن في المسألة سنة ولا إجماع وللإجتياز فيها مساغ لم تذكر على من عمل بها مجتهداً أو مقلداً.

وإنما دخل هذا اللبس من جهة أن القائل يعتقد أن مسائل الخلاف هي مسائل الاجتياز، كما اعتقد ذلك طوائف من الناس ممن ليس لهم تحقيق في العلم.

والصواب ما عليه الأئمة أن مسائل الاجتياز ما لم يكن فيها دليل يجب العمل به وجوياً ظاهراً مثل حديث صحيح لا معارض له من جنسه فيسوغ فيها - إذا عدم فيها الدليل الظاهر الذي يجب العمل به - الاجتياز لعارض الأدلة أو لخفاء الأدلة فيها) بيان

الدليل على بطلان التحليل \ 27\6

(Hadalka ay leeyihiin oo ah ; Masaisha khilaafka layskuma inkiri karo, sax ma,ahan, Maxaa yeeley inkiridu waxay ku dhacaysa hadalka, Fatwada ama camalka,

1- Hadii hadalku khilafo sunno ama ijmaac faafay waxaa waajibaya in la inkiryo sida la isla ogolyahay, Hadii uusan sidaas ahayn hadalkas tabardaridiisa in lacadeeyo iyo inuu khilaafay daliilka ayaa ah inkirid.

2- hadii camalku yahay Sunada khilaafkeeda ama ijmaaca khilaafkiisa waxaa waajibaya in la inkiryo iyada oo laraacayo talaabooyinka inkirida loo qaado, Sidee u oran karaa nin Fiqihi ah: layskuma inkiri karo Masaisha la isku khilaafay ? Fuqahadu waxay cadeeyeen in laburinayo xukumka uu gaaray xaakimka hadii uu khilafo Kitaabka iyo Sunada haba ku waafaqayn Culimada qaarkood.

Hadii mas,alada aan suno kusoo aroorin ama ijmaac, ijtihaadna ku banaanyahay laguma inkirayo qofkii ku camal fala mujtahid ha ahaado ama nin ku dayanaya Caalim.

Khaladkani waxa uu kasoo galay jihad ah ninka oranaya Masaisha khilaafka waa Masaisha ijtihaadka ,sida ay aaminsanyihiin kooxo kamid ah dadka oo aan lahayn cilmi sugan, sida saxda ah waxa weeye sida ay qabaan Aimada in masaisha ijtihaadka ay tahay mida aan ku dhexsugnayn daliil ay waajib tahay in lagu camal falo,daliil kaasoo ah mid cad sida xadiis saxiix ah oo aan ka hor imaanayn mid lamid ah markaas oo kale ayaa imanaysa in la ijtihaado

Gebo gebo

Su,aashu waxay tahay hadii uu ahaa jidka ay salafku u qaadeen masaisha lagu ijtihaado in aan la isku inkirin iskaba daayee in la isku gaaleeyo, halkee bay ka timid in la isku gaalaysiyo masaaishan oo kale?

Waxa ay ka timid kooxo ka inxiraafay manhajka salafka ujeedada ugu wayna ay tahay sidii islaamka iyo muslimiinta loo baa bi,inlahaa diintoodana looga fasahaadin lahaa,

Ilaahay waxaan ka baryayaa inuu xaqa nagu sugo naguna dilo aaaaaaamiin

أَخْوَكُمْ فِي اللَّهِ: حَذِيفَةُ رَاجِيٌّ عَلَى